UNITED NATIONS **NATIONS UNIES**

Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia
Springette, Off Lower Kabete Road, lst left after Spring Valley Police Station, P.O. Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya
Tel. (25420) 4183640, 4183642/3/4; Fax (25420) 4183641

MAALINTA BANI'AADAMNIMADA ADDUUNKA, 19ka Agoosto 2009
Farriinta Xiriiriyaha Bani'aadamnimada ee Qaramada Midoobey ee Soomaaliya

[NAYROOBI, 19 Agoosto 2009] Soomaaliya waa mid ka mid ah goobaha ugu halista badan shaqaalaha gargaarka ee dunida guudkeeda. Ilaa bishii Jannaayo 2008da, 42 shaqaalaha gargaarka ah ayaa la diley, 33 kalena waa la afduubey. Maanta waa maalintii Bani'aadamnimada Adduunka ee ugu horreysey, waxaana aan jeclahay in aan si gaar ah ugu hixtiraamo shaqaalaha bani'aadamnimada ee u go'ay hawshooda , nafahooda ku waayey ama lagu afduubey Soomaaliya. Waxaan sidoo kale doonayaa in aan dareenka dadka ku soo jeediyo handadaadda sida joogtada ah u sii kordheysa ee lagu hayo hawlaha bani'aadamnimada waxaana ugu baaqayaa maamullada in ay gartaan gargaarka in lagu badbaadinayo kuwo u baahan.

42da shaqaalaha bani'aadamnimada ah ee la diley ilaa 2008dii waxa ay ka kala yimaadeen qaybaha kala duwan ee bulshada bani'aadamnimada. Maalinkan maanta ah, waxaa mudan in aan ammaan gaar ah u jeedinno dhammaan shaqaalaha bani'aadamnimada ee Soomaalida oo si aan daal lahayn u wada hawshooda, una adkeystan halista ugu ba'an, kuna soo gaarto dhibaatada ugu daran.

11kii Agoosto waxa aan u dabaal-degney markii la sii daayey afar shaqaalaha gargaarka ah iyo labadoodii duuliye oo in ka badan 9 bilood la haystey. Shakhsiyaadkan waxa ay muujiyeen geesinimo weyn iyaga oo ku jirey xaalado aad u adag waxaana ku faraxsanahay in ay qoysaskoodii u soo noqdeen. Toban iyo sadddex kale oo shaqaalaha gargaarka ah ayaa weli la haystaa, qaarkoodna waxaaba la haystaa ilaa horraantii 2008da. Waxa aan fursaddaan uga faa'iideysanayaa in aan weydiisto kuwa haysta 13ka shaqaalaha gargaarka ah in ay iyaguna sidoo kale u oggolaadaan in ay qoysaskooda ku soo noqdaan.

Waxaa naxdin ah oo si aad ah u sii yaraanaya baaxada qeybo badan oo Soomaaliya ah inaysan gaari Karin howlaha samafalka. Bilihii ugu dambeeyey, dhowr hay'adood oo kuwa bani'aadamnimada ah ayaa xafiisyadii iyo bakhaaradii ay ku lahaayeen Soomaaliya ay galeeen, boobeen ama qaarkood ay qabsadeen kooxo hubeysan. Arrintaan ayaa waxa ka dhashey in hay'adaha bani'aadamnimadu ay ka biyo-diidaan in ay halis kale geliyaan shaqaalahooda, iyada oo ay u dheer tahay sahaydii iyo qalabkii gargaarka ee halkaa lagu waayey. Dhibbanayaasha dhabta ah ee tallaabooyinkan waa dadka saboolka ah ee nugul islamarkaana laga hor is taagay in ay bulshada bani'aadamnimadu u gargaarto.

Maanta waa ay mudan tahay in aan is xusuusino mabaa'diida aasaasiga ah ee bani'aadamnimada. **Aadanenimo:** waa mabda'a sheegaya in silica aadanaha wax laga qabto mar kasta oo la arko. Mabda'an ayaana ah kan gargaarka bani'aadamnimada keeney Soomaaliya ee ku dhiirigelinaya

hay'adaha in ay geeyaan gargaarka nafaha lagu badbaadinayo in kasta oo ay culaysyo jiraan. **Eex-la'aan:** waa mabda'a tilmaamaya in waxqabadka bani'aadamnimada loo bixiyo loona mudnaan siiyo iyada oo lagu saleynayo keliya baahida bani'aadamnimo. Mabda'an waxa uu hay'adaha bani'aadamnimada ka hor istaagayaa in ay dadka u kala soocaan/takooraan isirka, dheddig-labood (jinsi), dalka loo dhashey, fakirka siyaasadeed, sinjiga ama diinta. **Dhexdhexaadnimo:** waxa ay xaqiijineysaa in gargaarka bani'aadamnimadu ay tahay in la bixiyo iyada oo aan shaqaaqo la gelin ama aan dhinacna la raacin arrimaha lagu kala duwan yahay ee siyaasadda, diinta ama aydiyoolajiyada la halmaala. **U madax-bannaanaanta hawsha:** waxaa loola jeedaa in waxqabadka bani'aadamnimada ay khasab tahay in uu ka madax-bannaan yahay ujeeddooyin siyaasadeed, dhaqaale, militeri ama ujeeddooyin kale oo ay cidi ka leedahay degaanka laga fulinayo howlaha samafalka.

In kasta oo caqabado badan ay haystaan shaqaala bani'aadamnimada, haddana gargaarka bani'aadamnimada ee lagu badbaadinayo ayaa weli laga bixinayaa guud ahaan dalka. Tusaalayaalna waxaa loo soo qaadan karaa, qaybintii 27,500 oo xirmooyinka agabka aan cuntada ahayn ah oo loo qaybiyey dadkii Muqdisho ka soo qaxay ilaa bishii Maajo; cuntada bil kasta oo sanadkan ka mid ah la siinayo celcelis ahaan 2.2 milyan oo qof; biyaha nadiifta ah ee la gaarsiiyey in ka badan 600,000 oo qof; iyo boqollaalka kun ee ka faa'iideystey barnaamijyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyo tallaalka.

Maalintan Bani'aadamnimada Adduunka, waxa aan ugu baaqayaa dhammaan maamulada ka jira Soomaaliya in ay aqoonsadaan oo ay ixtiraamaan hay'adaha bani'aadamnimada iyo in ay ku taageeraan si aan caqabad lahayn u gaaraan dadka u baahan.

Saxiix

Graham Farmer
Ku-simaha Madaxa Qaramada Midoobey iyo Xiriiriyaha Bani'aadamnimada

Qoraal Tifaftir: Sanadkii la soo dhaafey, Golaha Loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobey ayaa go'aansaday in Maalinta Bani'aadamnimada Adduunka la xuso 19ka Agoosto sanad kasta si kor loogu qaado wacyiga dadweynaha ee ku aaddan waxqabadyada gargaarka bani'aadamnimada ee dunida oo dhan iyo si loo sharfo dhammaan shaqaalaha bani'aadamnimada, gaar ahaan kuwa nafahooda ku waayey iyaga oo hawshooda gudanaya. Sababta loo doortey 19ka Agoosto waa in maalintaas oo kale sanadkii 2003dii ay dhacdey Qarxintii Hoteelka Kanaal ee magaalada Baqdaad (Ciraaq) ee keentey geerida 22 qof, oo badidoodu ahaayeen shaqaalaha Qaramada Midoobey.

Macluumaad dheeri ah kala soo xiriir: Muna Maxamed, Sarkaalka Warbixinnada, +254-733-64 37 37 ama mohamed26@un.org.

Qoraallo iyo khariidado kale oo ku saabsan xaaladda Soomaaliya ka eeg:
www.ochaonline.un.org/somalia